

# Ku socota adiga qaba xanuun waqti dheer ah

*Mararka qaarkood xanuunku uma tago sidii la filaayey, wuxuuna sii jiraa waqti dheer. Macluumaadkaan wuxuu ku socdaa adiga leh xanuun waqti dheer ah. Taa micnaheedu waa in aad lahayd xanuun ugu yaraan saddex bilood. Halkaan waxaad ka ogaaneysaa macluumaad dheeraad ah oo la xariira waxa ku dhacaaya jirka markii xanuunku noqdo mid daba dheeraada iyo waxa muhiimka ah in laga fikiro si aad u dareento caafimaad fiican intii suurtagal ah.*

## Maxaa ku dhacaaya jirka markii xanuun ku haayo waqti dheer?

Nidaamka xanuunka ee jirku waa qayb kamid nidaamka neerfaha. Markii meel xanuun qabto waxaa dhambaal u dirmayaa xangullaha laf-dhabarta una sii gudbaaya xagga maskaxda. Marka dhambaaladu ay gaaraan maskaxda ayaa waxaan ogaaneynaa xanuunka, islamarkaana aan ka falcelineynaa xanuunka si dareen leh.

Mararka qaarkood habka nidaamka neerfaha u maareeya dhambaalada ayaa is bedelaaya. Neerfayaasha waxay noqon karaan kuwo nugul oo maskaxda ayaa waxay xanuunka u turjumeysaa si isdabajoog ah oo degdeg ah, islamarkaana nidaamka xanuun-dhimista ee jirka ayaa bilaabaya inuu si xun u shaqeeyo. Tani waxay horseedi kartaa inuu xanuunka sii jiro, xitaa markii dhaawacii asalka ahaa uu bogsado. Daryeelka caafimaadka waxaa looga yaqaanaa dareenka nugul ee xad-dhaafka ah ama xanuunka *nosiblastikada*.

Markii dareenku noqdo mid nugul oo xad dhaaf ah ayuu markaa xanuunku noqday cudur gaar ah. Nidaamka-xanuunku wuxuu noqday mid nuglaantiisa sarreyso, xanuunkana wuxuu u dhaqmi kaaraa si aan caqli gal ahayn oo la yaab leh. Tusaale ahaan, xanuunka wuxuu ku fidi kara aag wayn waxaana dareemi karnaa damaqasho islamarka si fudud noola taabto. Waxaan sidoo kale dareemi karnaa inaan xanuunsanayno xitaa markii hawl aad qabanaysay dhamaato kadib.

Marka qaarkood xanuunka waqtiga dheer ah wuxuu imaan karaa iyadoo aysan jirin dhaawac ama cudur hore. Tusaale ahaan, xanuunku wuxuu samaysmi karaa markii uu kadeed jiro. Isla mar ahaantane xanuunka ayaa abuuri kara fal-celin kadeed ah si markaa iskadaba wareeg xun u samaysmo. Waxaa sidoo kale caadi ah in dadka qaba xanuun waqti dheer ah inay ku dhacdo dhibaato hurdo iyo in dadka dhibaatooyinka hurdo leh ay la kulmaan xanuun siyaado ah. Markaas waxaa adkaan karta in la go'aamiyo waxa wax sababi kara.

Xanuunka, kadeedka iyo hurdo xumida ayaa sidoo kale keeni kara calaamado cudur oo kale. Xusuusta iyo feejignaanta ayaa u shaqayn kara si xun. Waxaa saamayn ku imaan karaa dabeecadda si qofku si fudud u xanaaqo, murugoodo una niyad jabo. Daal iyo walaac ayaa sidoo kale caadi ah.

## Daawaaynta iyo baxnaaninta

Marka uu xanuunku noqdo mid waqti dheer jira way sii adagtahay in la daaweeyo. Inta badan hadafka daawayntu waa in la khafiifiyo xanuunka, la yareeyo calaamadaha kale iyo in la helo istaraatajiyo keenaya in nololmaalmeedka u shaqeeyo si wanaagsan inkasta oo xanuun jiro.

### *Daawooyin*

Marka xanuunku uu jiro waqtiga dheer, sida caadiga ah xanuun baabi'iyaha si xun ayuu badanaa u shaqeeyaa. Taa bedelkeeda waxaa fiicnaan karta in la tijaabiyo daawooyin kale oo yaraynaaya dareenka xad-dhaafka ah ee nidaamka neerfaha. Qaar kamid ah daawooyinka lidka ku ah niyad jabka iyo qalalka ayaa mararka qaarkood yarayn kara dareenka xanuunka, laakiin waa naadir inay qaadaan xanuunka dhan. Daawooyinka noocan ah waa in si joogto ah loo qaato waqti dheer si ay waxtar u yeeshaan. Weydii dhakhtarkaaga daawooyinka ku habboon nooca xanuunkaaga.

Mararka qaarkood waxaa lagama maarmaan ah in lagu daaweeyo calaamadaha kale daawo, sida hurdo la'aanta iyo walaaca. Markii xanuun daba dheeraaday uu jiro daawooyinka waxay un kaalmo u yihiin daawayn kale. Waa naadir in ay ku filnaanto daawaynto daawo kaliya.

### *Dhaqdhaqaaqa jirka iyo jimicsiga*

Dad badan oo la nool xanuunka waxay ka taxadirayaan dhaqdhaqaaqa si aysan u helin xanuun siyaado ah. Laakiin markii la nasanaayo waxaa daciifaya muruqyada waxaana si xun u shaqaynaaya nidaamka xanuun-dhimista ee jirka. Sidaas baa dhaqdhaqaaq la'aantu waxay horseedi kartaa xanuun badan mustaqbalka fog. Waa muhiim in firfircoonaanta sii socota oo la dhaqdhaqaaqo si caadi ah intii suurtoagal ah. Dhaqdhaqaaqa jireed wuxuu yarayn karaa kadeedka wuxuuna xoojiyaa nidaamka xanuun-dhimista ee jirka. Inta lagu gudo jiro dhaqdhaqaaqa wuxuu jirka sidoo kale soo saaraa "maado-dareen-wanaag" ah oo si fiican u caabinaaya xanuunka oona yaraynaaya khatarta niyad jabka. Waa muhiim in jimicsigu adiga kugu habboonyahay. Kalkaaliyaha jimicsiga jirka ayaa kaa caawin kara inaad fahanto sida jirkaaga u shaqeynaayo oo aad u hesho hab jimicsi oo kuu oggolaanaya in aad kusii wado dhaqdhaqaaqidaada heer habboon.

### *Daawaynta maskaxda*

Mararka qaarkood waxaad u baahnaan kartaa taageero si aad u maarayso dhibaatooyinka uu xanuunka keeno. Waxay noqon kartaa inay ku saabsantahay murugo la xariirta fursado lumay, dareen is-eedayn ah, xanaaq ama dareen-muuqaaleed is bedelay. Waxaa laga yaabaa in aad ku dhegtay hab dhaqan horay kugu shaqayn jiray, laakiin aan hadda ku caawinayn, tusaale ahaan in marwalba dadka kale u istaagto. Cilmi-nafsi yaqaanka ayaa kaa caawin kara in samaysid dabeecad isbedelka si xanuunku u yara xadidnaado nololmaalmeedkaaga kuguna caawiyo in tamartaada iskugu geysid waxa muhiim kuu ah adiga. Cilmi-nafsi yaqaanku waxa kale oo uu bari karaa farsamooyin maskaxda lagu dajin karo iyo maareynta kadeedka.

### *Nololmaalmeed shaqaynaaya*

Adiga la nool xanuun waxaa si gaar ah muhiim kuu leh nolol joogto ah oo leh caadooyin wanaagsan marka ay timaado cuntada, hurdada, jimicsiga iyo aalkolada. Isku dheelitir wanaagsan oo u dhaxeeya dhaqdhaqaaqa iyo nasashada ayaa qiimo leh, sidoo kale isku dheelitir u dhaxeeya "waxyaabaha qasabka ah" iyo waxyaabaha farxadda keena. Dareenada wanaagsan waxay fududeeyaan in la maareeyo xanuunka. Si wada jir ah cunta-yaqaanka, talo-bixiyaha arrimaha caafimaadka shaqada iyo kalkaalisada caafimaadka ayaa sahmin kara kuwa ay yihiin rootiinnada oo adiga sida wanaagsan kugu shaqeynaaya. Talo-bixiyaha arrimaha caafimaadka shaqada wuxuu ku siin karaa talooyin ku saabsan qalabka ku saacidi karo iyo sida nololmaalmeedkaga loo fududayn karo. La-taliyaha arrimaha bulshada ama isku-duwaha baxnaaninta ayaa xadhiidhin kara xariirka u dhaxeeya caafimaadka, shaqo-bixiyaha iyo qasnadda-caymiska marka loo baahdo iskudubarid. Waxa kale oo muhiim noqon karta in qaraabadu qof u sheegaan sida ay xaaladooda tahay, si markaa ay jawaabo ugu helaan su'aalhooda ayna kugu taageeri karaan sida ugu wanaagsan.

### **In lala noolaado xanuun waqti dheer ah**

Xanuunka marwalba lama daawayn karo. Qaar badan xanuunku wuu dhaafaa muddo kadib, laakiin xitaa haddii uu sii jiro oo qaybo badan oo noolasha kamid ah uu xanuunka saameeyo waxaa jira waxyaabo badan oo la sameeyo si aad u fiicnaato, si markaa aad u hesho farxad iyo nolol macno leh. Shaqada nidaamka neerfaha ayaa sidoo kale caadi noqon kara waqti kadib si markaa xanuunka kaaga yaraado.

- ! Maskaxda ku hay xitaa in adiga leh xanuunka waqtiga dheer in ay kugu dhici karaan cudurro kale. Haddii uu xanuun cusub yimaado oo aadan aqoonsan waa in aad raadsataa daryeel caafimaad sida dadka kale.